

Dhammeystirka Alaabta lagu Ciyaaro (Toyga)

Dhammeystirka alaabta lagu ciyaaro waa alaabta lagu ciyaaro oo leh bilow iyo dhammaad qeexan. Taasi waxay caawineysaa inay u qeexdo ubadka habka loo isticmaalo sheeyga uu ku ciyaarayo; sida "Alla, qaybihii galeen, mas'aladii dhamaa."

Waxyaabaha hoos ku qoran waa tusaalooyinka ee ku saabsan dhammeystirka alaabta lagu ciyaaro ama toyga:

- Isdhexgeli mas'aladaha (istimaal qaybo yar-yar oo tiradoodu yartahay, ama kuwa waaweyn kula xir cadad kale).
- Xirmo is dhexgala
- Koobabka la is dhexgeliyo
- Kala saaraha qaabka
- Tixidda kuusha
- Shaxda ama jarada
- Mr.Potato Head

Ku bilow cadad yar-yar, sida 3 cad ee mas'alada (bazzalka). Kadib dhexgeli weel yar meel u dhow goobta ciyaarta.

Marka aad xulaynaysid alaabta lagu ciyaaro, xusuusnow waxa ubadkaagu jecelyahay. Tani waxay dhiirigalin utahay in uu ubadku ka qayb-qaato ciyaarta. Tusaale, haddii ubadka ka helo gawaadhida lagu ciyaaro, isticmaal bazzal leh sawiro gaadhi ama sharac weelka uu ku jidho kala saaraha qaabka, isticmaalna sawiro gaadhi, ama saworada ku dhega meelaha.